XAQIIQOOYIN DHAKHSO LEH LOOGU TALAGALAY WAALIDIINTA

Aqoonta ku saabsan **Xiriirada Caafimaad-qabka ah iyo Oggolaanshaha**

Oggolaanshaha: "Inaad aqbasho inaad wax samayso ama u siin fasax inuu wax qabsoomo ama la fuliyo."

- Qaamuusyada Oxford, 2015.

Laga soo bilaabo da' hore, carruurta ayaa bilowda inay kala xaajoodaan waxay ku kici karaan ama waxa aynan ku kici karin qoysaskooda , dugsigooda iyo beeshoodaba dhexdii. Kolba markay carruurtu sii kobcaysana, xirfadahooda iyo aqoontooda ku saabsan oggolaanshaha ayaa u baahan inay iyaduna la korto. Xirfadahan ayaa ka caawin doona siday ula dhaqmi lahaayeen xaaladaha iyo xiriirada kala duwan oo mararka qaarkood noqon kartaa mid adag.

Manhajka caafimaadka iyo waxbarashada jirka caawiya carruurta iyo dhalinyarada si ay u fahmaan "oggolaansho" waxay micnaheedu tahay oo ay bartaan xirfadaha ay ugu baahan yihiin:

- Inay qof ahaan is-difaacaan
- Inay qof ahaan isxtiraamaan oo dadka kalena ixtiraamaan.

AQOONTA KU SAABSAN OGGOLAANSHAHA

- Wada hadalka iyo isixtiraamka wanaagsan ayaa u horseedaan xiriirada ka sii fiican ee saaxiibbada, asaagga, qoyska iyo lammaanayaasha kalgacaylka.
- Oggolaanshu waa ogaanta oo ixtiraamidda xuduudaha aad adigu iska leedahay iyo kuwa dadka kaleba aad degsatay. Markay tahay nooc kasta oo xiriir yeelasho, garashada waxa adiga iyo dadka kaleba u habboon ayaa kaa caawin kara si xiriir caafimaad-qab iyo ammaanba ah loo yeesho.
- Oggolaanshuhu wuxuu ku saabsan yahay lahaanta xirfadaha lagaga fogaado ama lagaga tago xaalad loo dareemo inay tahay mid aan habbooneen iyo ixtiraamka markay kuwa kale rabaan inay sidoo kale sameeyaan.
- Fahamka iyo ka wada hadalka ku saabsan arrimaha oggolaanshaha gogol-wadaagga (sexual consent) ayaa laga maarmaan u ah xidhiidhka kalgacaylka caafimaad-qabka iyo caafimaadka arrimaha gogol-wadaagga.

Oggolaanshuhu wuxuu ku saabsan yahay wada hadalka iyo ixtiraamka. Wada hadalka ayaa u horseeda xiriir uga fiican sidii hore saaxiibbada, asaagga, qoyska iyo lammaanayaasha kalgacaylka.

MAXAY KA DHIGAN TAHAY OGGOLAANSHAHA *GOGOL-WADAAG*?

- Oggolaanshaha gogol-wadaagga ayaa ah xaqa u qof u leeyahay inuu kari u yeesho inuu doorto "haa" ama inuu doorto "maya."
- Oggolaanshaha gogol-wadaagga ayaa ku lug leh heshiis cad oo ula kac ah in looga qaybgalo ficil gogol-wadaag, lagu fuliyay hadal ama aan hadalba ahayn oo ka dhexeeya shakhsiyaad. Qof aan miyir lahayn, ama maandoorsan (tus., sakhraansan), ama lagu dirqiyay ama lagu qasbay ma bixin karo oggolaansho.
- Qof kasta waxa u leeyahay xilka u si xor ah uu ugu bixiyo ama ku siiyo oggolaansho kahor intaan laga qaybgalin ficillada gogol-wadaagga.
- Weydiisadka iyo bixinta oggolaanshaha ayaa ah nidaam socda. Qof kasta ayaa xaq u leh inay maskaxdooda beddelaan (tus., "maya" dhahaan) wakhti kasta.
- Oggolaanshaha gogol-wadaaga waxaa lagu aqoonsadaa in qof kasta xakameeyo jirkeenna u gaar ah, gogol-wadaag iyo waayo-aragnimada.
- Oggolaanshaha gogol-wadaaggu waa wax ay dadku u baahan yihiin inay ka wada hadlaan, iyada oo aan ku xidhnayn dhererka xidhiidhka ay leeyihiin ama waayo-aragnimada ay u leeyihiin.

Ku weerarka gogol-wadaagga ayaa ah kulan gogol-wadaag kasta oo lahayn oggolaansho xor ahaan loo bixiyay. Weerarka gogol-wadaagga ayaa badanaa ku dhaca dadka is yaqaan.

MAXAY ARDAYDU KAGA BARTAAN DUGSIGA ARRIMAHA KU SAABSAN XIRIIRADA CAAFIMAAD-QABKA IYO OGGOLAANSHAHA?

Ardaydu waxay bartaan xirfadaha aasaasiga ah ee ku saabsan ixtiraamka xuduudahooda iyo kuwa dadka kaleba markay iskaashanayaan asaaggooda, ee ay xalinayaan mas'alooyinka oo ay ka fikirayaan waxay soo mareen–waxyaabaha ay qabtaan ee ah dhammaan maadooyinka waxbarashadooda - tusaale ahaan farshaxanka, xisaabta, luqadda/Ingiriisiga, cilmi bulsheedka, iyo saynis bulshada iyo culuunta guud. Waxay ku dabaqi karaan xirfadahan kolba markay baranayaan arrimaha ku saabsan oggolaanshaha oo ay baranayaan go'aannada caafimaad-qabka ah oo ee ku saabsan xidhiidhkooda.

Maxaad ardayda ka sii da' yari bartaan?

Manhajka ayaa ka caawiya ardayda da' kasta leh inay horumariyaan kartidooda ay kula hadli lahaayeen dadka kale arrimaha ku saabsan fikradaha, dareennada, ujeeddooyinka iyo xuduudaha iyo in loogu dhaqmo si ixtiraam leh nooc kasta oo xiriir ah. Saldhigga loogu talagalay wax ka barashada ku saabsan arrimaha oggolaanshaha ayaa ka bilaabanta in aasaas loo dhigo da' yarida. Carruurta sii yar ayaa u barta, habab ku habboon oo ay da'dooda iyo heerka kobacooda, in dadka ku jira xiriir kasta ha noqotee ay ka saaran tahay xil inay is-ixtiraamaan oo ay si fiican u wada dhaqmaan.

Ardayda da'da sii yar leh ee dhigata fasallada 1, 2 iyo 3 ayaa ku barta arrimaha ku saabsan oggolaanshaha iyaga oo:

- Dhegaysta oo joojiya haddii u qof u weydiisto inay joojiyaan dhihid wax ama wax ku kaca
- Ku wadaagista boosaska gudaha fasalka
- Ugu muujiinta ixtiraamka dadka kale hadalkooda iyo ficilkoodaba
- Ku kaayaysiga qalabka waxbarashada isboortiga iyo fasalka gudahiisaba
- Waydiinta qof si ay u joojiyaan haddii qofka kale waxa uu ka hadlayaa ama dhaqmayaan qaabkaas ah in iyaga dhaafaan.

Ardayda da'da sii yar ah ayaa barta arrimaha ku saabsan:

- Isdifaacooda
- Dhagaysiga firfircoon – u fiirsiga kaliya aan ahayn ereyada laakiin waliba ah shucuur ka bixinta wajiga, kolba codku sida u dhacayo iyo ka hadalka jirka
- Hab u dhaqanka aan waxyeellada u lahayn dadka kale ama naftoodaba
- U muujinta ixtiraamka dadka kale.

Maxay ardayda waawayni bartaan?

Ardayda waawayn ee dhigata fasallada 4 aad iyo kuwa ka sarreeya ayaa ugu sii wata barashada, habab ugu habboon da'dooda iyo heerka kobacooda, in oggolaanshahooda yahay xil la wadaago. Waxay iyagu:

- Ku sii wataan kobcinta xirfadahooda inay:
  - U muujiyaan ixtiraam, dhagaystaan, oo nugloodaan baahiydada dadka kale
  - qofka la hadlaan, hal adayg yeeshaan, oo ay dhahaan "maya"
- Bartaan gaar ahaan oo ku saabsan ixtiraamka, xiriirada caafimaadqabka ah iyo oggolaanshaha gogol-wadaagga "wuxuu yahay"
- Bartaan arrimaha ku saabsan cawaaqibka sharci, bulsho iyo shucuureed marka aan loo fiirsan oggolaanshaha
- Bartaan sida looga warbixiyo arrimaha iyo sida looga helo caawimada dadka waawayn naxariista leh ama iyada oo la maro ilaha beesha (tus., booliiska, dhakhaatiirta, rugaha caafimaadka dadwaynaha, xarumaha, saaxiibbada).

Isticmaalaan daraasadaha kiiska, dhacdooyinka iyo ka wada hadalka, macalimiinta ayaa ka caawisa ardayda arrintaas:

- Labada qof ee xidhiidhka ayaa u baahan in ay si firfircoon uga qaybgalaan bixinta oggolaanshaha markaas ah
- Oggolaanshaha hal ficil gogol-wadaag micnaheedu ma aha oggolaansho ficillo dhammaantood
- Micnaha "haa" ayaa kaliya ah "haa"
- Oggolaanshaha looma malayn karo.

KA HADALKA ILMAHAAGA AAD KALA HADLEYSO OGGOLAANSHAHA

Waalidka iyo dugsiyada ayaa ka wada shaqayn kara inay ka caawiyaan carruurta sidii ay u kobcin lahaayeen xidhiidhyo caafimaad-qab ah iyo inay fahamaan oggolaanshaha. Tixgali fikradahan:

Markay tahay carruurta yaryar:

- Ku dhiirogeli carruurtaadu inay dhagaystaan oo u fiirsadaan "calaamadaha" muujinaya xuduudaha dadka kale (tusaale ahaan, markay dadku kaa istaagaan dhowr tallaabo si ay u ilaashadaan shaqsiyaddooda u gaarka ah).
- Xooji fahamkooda in u jirkooda iyagu iska leeyihiin iyo oo ay xaq u leeyihiin oo xil ka saaran yahay inay ka gaadhaan go'aamo arrintaas oo ay ilaaliyaan naftooda.
- Ka caawi inay ku barbartaan waxay dhihi karaan iyo waxay ku kici lahaayeen iyo haddii ay la kulmaan xaalad aan u habboonayn.
- Ku dhiirogeli carruurtaadu inay maqlaan dareenkooda oo ay ka hadlaan haddii u wax u dareemaan inaanu sax ahayn, oo kala hadal sidii ay u heli lahaayeen caawimaad.

Markay tahay carruurta iyo dhallinta:

- Kala hadalka iyaga arrimaha ku saabsan xuduudahooda, su'aalaha iyo qiyamyada markay tahay arrimaha gogol-wadaagga.
- Ku dhiirogeli inay qaddariyaan xaaladaha kala duwan ee ay u baahan doonaan inay mowqif cad iska taagaan xuduudahooda.
- Kala hadal arrimaha ku saabsan oggolaanshaha, ku dirqiga, u hoosaasinta, xasaradaynta, iyo ku weerarka gogol-wadaagga. Ka dhaadhici carruurtaada inay leeyihiin cod oo la dhegeysan doono.
- Kala hadal cawaaqibta ay yeelan doonto sharci ahaan, bulsho ahaan iyo shucuur ahaan markay dhacdo gogol-wadaag aan la oggolaan.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

» Gogol-wadaagga iyo Sharciga wuxuu ka yimid www.sexualityandu.ca
» Ontario Coalition of Rape Crisis Centres (Isbahaysiga Ontario ee Xarimaha Mushkilooyinka Kufsiga) www.sexualassaultsupport.ca/page-535967
» Koox Cilmi-baaris saldhiggeedu yahay Alberta oo dhiirogelisa waxbarashada arrimaha oggolaanshaha iyo joojinta shaqaaqada arrimaha gogol-wadaagga ka dhaca www.consented.ca

Ontario

ISBN 978-1-4606-5900-7 (Print) ISBN 978-1-4606-5901-4 (PDF) (Somali)
© Queen's printer for Ontario, (Daabacaadda Queen ee Ontario), 2015